

U Diyaar Garowga Fasalka Kindergarten

Hagaha waalidka ee Dugsiyada
dadweynaha Minneapolis



mbarada Taleefanada Muhiimka ah.

Howlgalka Waaxda

Kor u qaadida Waxbarashada carruurta yar-yar, waa in la garrisiiyaa bulshada, iskaashiga lagu taageerayo kobcinta horumarinta koritaanka caafimaad ee dhallaanka marka uu dhasho ilaa inta ay ka gaarayaan todobo sano jirka. Horumarintaan waxay u diyaarinaysaa dhallaanka la qabsiga dugsiga iyo ku guuleysiga waxbarashada dugsiga.

Aragtida Waaxda

Qoys walba, Cunugg kasta, maalin kasta, waa in ay diyaar u yihiin guusha Dugsiga.

Waxbarashada Dhallaanka

Amminka Hore **612.668.2140**

Shabakadda: ece.mpls.k12.mn.us

MPS First Stop **612.668.3717**

Email: firststop@mpls.k12.mn.us

Shabakadda: ece.mpls.k12.mn.us/firststop

Hubinta Dhallaanka Amminka Hore **612.668.3715**

ece.mpls.k12.mn.us/screen

Waxbarashada Dhallaanka

Qoysaska Amminka Hore..... **612.668.2127**

Email: mpls.ecfe@mpls.k12.mn.us

Shabakadda: ece.mpls.k12.mn.us/ecfe

Waxbarashada Gaarka ah ee

Dhallaanka Amminka Hore **612.668.5100**

Shabakadda: ecse.mpls.k12.mn.us

Xarunta Meelaynta Ardayda **612.668.1840**

Email: sps.department@mpls.k12.mn.us

exploremps.org

Kaalmada Luuqadaha

(Qoysaska luuqadodoo aheyn mida ingariiska)

Isbaanish 612.668.3700

Soomaali 612.668.3700

Hmoob 612.668.1840

Waaxda Waxbarashada Minnesota **651.582.8200**

Shabakadda: education.state.mn.us

Minneapolis Kids **612.668.3890**

(Barnaamjika xanaanada carruuta da'aada dugsiga)

Email: mpls.kids@mpls.k12.mn.us

mplskids.mpls.k12.mn.us

Diiwaan Galinta Furan **612.668.1840**

(Carruurta qoyskoodu dagan yihiin banaanka magaalada Minneapolis)

Barnaamjika Dhallinyarada Uurka Leh..... **612.668.4703**

Email: teenparentservices@mpls.k12.mn.us

ece.mpls.k12.mn.us/tps

Buugga Eray Bixinta

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis, waxaa uu kula wadaagayaan ogaal jeclidaadda aad ku doonayso in cunnugaagu khibrad wax tar leh ka helo fasalka kindergarten, waxaana aamminsanahay in taasi furaheedu tahay iskaashiga. Iskaashiga ka dhxeeyya qoysaska iyo dugsiyadu waxay abuuri karaa isbadel weyn in cunnugaagu ku fiicnaado dugsiga. Si aan u xoojino wada shaqeeynteen, buugg yarahaan ayaa laguu diyaariyey in badan oo su'aalahaaga kaaga jawaabi doona.



Numbarada Telafoonada miihim ah	2
Kusoo dhawaada Kindergarten.....	4
U diyaar garowga Kindergarten.....	5
Hubinta dhalaanka amminka Hore.....	6
Talaallada	7
Maxaa ka socda Fasallada High Five?.....	8
Maxaa ka socda Fasallada Kindergarten?.....	9
Sidee loo Doortaa Dugsiga	10
Waxyaalaha la fiiriyo marka la booqanayo dugsiga.....	12
Macluumaadka Diiwaan-galinta	13
Waxqabadyada Horumariya Waxbarashada (Dhalasho ilaa 2 jirka)	14
Waxqabadyada Horimariya Waxbarashada (3 ilaa 5).....	15
U Gudubka Fasalka Kindergarten	16
Erey-Bixin	17
Barnaamijka Gobolka Minnesota	19

Ku soo Dhawaada Kindergarten

Waalidka ama Mas'uulka ardayga Sharafta leh

Xanaanada Carruurta (Kindergarten) Waa tallaabada koowaad ee ugu muhiimsan dugsiyada hoose, wuxuuna cunnuga ka helaa giil waxbarasho caruurreed oo aassaasi ah.



Fasalka dhexdiisa, caruurrta ayaa ekeynaya waxyaabaha Dugsiyada Degmadu ay ka filayaan caruurrta fasalada kindergarten dhinacyada akhriska, xisaabya iyo qoraalka, si ay uga kobcaan maskaxda iyo dhimirkaa. Iyadoo loo adeegsanayo hananka waxbarida ugu suuban Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis(MPS) waxay u diyaariyaan meel si diiran loogu soo dhawaynayo bay'ad carruurtoo idil wax ku barankaraan, kuna guulaysan doonaan.

Macalimiintu waxay isticmaalaan qaababka ugu fiican ee wax lagu baro caruurtta xanaanada:

- Dhisid khibradda ay caruurtu ka heleen guriga iyo barnaamijyada dugsiyada bilawga.
- Ka kaalinayaan carruurtu inay kasbadaan aqoonta iyo xirfadaha akhriisa iyo xisaabta.
- Ka qayb qaadanayaan carruurtu wax-qabadyogacan-ku-hayn lagu barto.
- Diyaarin koox isu dheellitiran, kooxo har, koox badan iyo wax-qabad keli keli ah.
- Qiimayn horumarka ay carruurtu samaynayso iyadoo macllinku indha indhaynayo ardayga iyoshaqada uu qabto.
- Ka caawin ilmaha is-dhex-galka carruurtu kale iyo dadka waaweynba.
- Kobcinta xirfadaha dad la dhaqanka, kana mid yihiin xallinta mashaakilaadka.
- Ka qayb qaadashada waalidka waxbarashada caruurtooda.

Haddii mid ka mid ah su'aalahaga aan looga jawaabin buug-yarahaan, fadlan wac Waaxda Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ama Xafiiska Adeegyada Diiwaangalinta Ardayga. Qoysaska ku hadla luqad aan Ingiriisi ahayn waa inay la xiriiraan Xafiiska Diiwaangalinta Ardayga.

Nambarada telefoonku waxay ku qoran yihiin gudaha jaldiga hore ee buug-yarahaan.

U Diyaar Garowga Fasalka kindergarten

**Tallaabooyinkaan soo socda waxay ku siinayaan
fikrado aad ugu diyaarin karto ilmahaaga
fasalka kindegarten:**

- ① Marka uu cunuggaaga jirsado da'da 3 jirka, wac si aad ballan ugu sameeyso hubibta cunugga. Call 612.668.3715 ama emailka screen@mpls.k12.mn.us. Diikwaanka Hubinta dhalaanka amminka hore waxay kaa caawinayaan isdiiwaan galinta. Macluumaadka la xiriira, eeg bogga 6aad.
- ② Ku fikir inaad Cunugga ku qorto barnaamijka fasalka barbaarinta sida fasalada, High Five, Head Start, iyo Waxbarashada Dhallaanka Qoysaska Amminka Hore, Barnaamijka xanaanada carruurta oo tayo leh ama barnaamijka Waxbarashada Bullshada.
- ③ Booqo Dugsiyada ku yaal dariskaaga ama dugsiyada aad xiisaynayo.
- ④ Dooro Dugsiga aad rabto sanad dugsiyeedka soo socda. Codashada Dugsiyada waxaad ka buuxin kardaa onlinka: exploremps.org

Foomka codsiga dugsiyada waad heli kartaa waana in aad soo dirtaa:

Xafiiska Meeleynta Ardayda
1250 W. Broadway Ave.
Minneapolis, MN 55411
Ama online
exploremps.org

- ⑤ Marka ilamahaaga lagu meeleeyo dugsiga,iska hubi in aad dhameysirtid nadaamka diiwaangalinta dugsiga. Diiwaan galinta fasalka Kindergarten iyo u diyaarinta gaadiidka baska waxaa la sameeyaa inta badan xiliga Gu'ga.



Hubinta Dhallaanka Amminka Hore Da'aada

3-5 jirka*

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxay kutalinayaan in cunugga lagu hubiyo 3 jir, balse soowac goor kasta haddii aad ka wel wel qabto kobocacunugga iyo koritaankiisa- hubinta ayaa la samaynkaraa 3 jir ka hor.

Sadex Sababood ee loo hubiyo 3 jirka*

1. Hubinta ayaa ka caawinaya in ay diyaar u noqdaan dugsiga.
2. Koboca caafimaadiyo walaac koboc ayaa la ogaan karaa goor hore. taasina waxay noo suurtagalinasaa inaan kaalmadda u bilowno amminka hore.
3. Maxaa yeelay hubinta ayaa lacag la'aan ah, waa sahlan tahay waana u fiican tahay cunuggaaga!

Marka Cunuggaagu 3 Jirsado.

1. Wac 612.668.3715 (screen@mpls.k12.mn.us) aad ballan u qabsato.
2. Dhammaystir warqadaha caafimaadka boostada kuugu yimid.
3. Keen cunuggaaga ballaanta hubinta, iyadoo shaqaale carbisan hubinayaan cunuggaaga:
 - Aragga iyo Maqalka
 - Koriimada iyo Koboca
 - Immunizations and family history
4. Keen warqadda dhalashada iyo tallaallada xilliga hubinta.
5. Hubinta ayaa la door bidaa 3 jir, laakin la samayn karaa 4 ama 5 jir.

Hubinta Dhallaanka Amminka Hore ayaa Caawisa:

1. Inaad fahamto sida cunuggaagu yahay.
2. Kugu xiraya barnaamijyada dhallaanka amminka hore iyo adeegyada
3. Kaaga jawaabayaa su'aalaha la xiriira korinta waalidnimo

Macluumaadka Halka Lala Xiriirayo

Telefoon: 612.668.3715

Shabakadda: screen@mpls.k12.mn.us.

Shabakadda: ece.mpls.k12.mn.us/screen

Habraaca Diiwaan gelinta: Wac oo ballan qabsoKhidmadda

Kharashka: waa bilaash

* Sharciga gobolka ayaa ka doonaya carruurta oo idil inla hubiyo inta ayan gelin Kindergarten.



Tallaallada

U adeegso shaxdaan kuu tilmaan-bixinaysa sidii aad u go'aamiso tallaallada looga baahan yahay is-qorista daryeelka xanaanada caruurta,barnaamijyada caruurnimada hore, iyo dugsiga (kuwa guud ama kuwa gaarka ah).

Dugsiga barbaarinta (da'da 3-5)	Xannaanada (da'da 5-6) (3)	Fasalada 1-6 (da'da 7-11)	Fasalada 7-12 (da'da 12 iyo ka weyn)
Hepatitis A (Hep A) ✓			
Hepatitis B (Hep B) ✓✓✓	Hepatitis B ✓✓✓	Hepatitis B ✓✓✓	Hepatitis B ✓✓✓ (7)
DTaP/DT ✓✓✓✓✓	DTaP/DT ✓✓✓✓✓✓ (4)	✓✓✓ teetanada iyo gawracatada ay ka kooban yihiin qaadasho Kuurad (6)	✓ Tdap & ugu yaraan 2 teetanada iyo gawracatada ay kujiraan qiyasood (8)
Polio ✓✓✓	Polio ✓✓✓✓ (5)	Polio ✓✓✓	Polio ✓✓✓
MMR ✓	MMR ✓✓	MMR ✓✓	MMR ✓✓
Hib ✓			Meningococal ✓ (toogasho xoojin ah) (9)
Pneumococcal ✓✓✓✓ (1)			
Varicella ✓ (2)	Varicella ✓✓ (2)	Varicella ✓✓ (2)	Varicella ✓✓

Influenza (Talaalka Hargab Sanad kasta oo loogu talagalay dhammaan carruurta jirta 6 bilood iyo wixii ka weyn)

Rotavirus

talaalka loogu talagalay dhallaank

Human Papillomavirus

Loogu talo galay Da'da 11-12 sano

- Looma baahna 24an bilood kadib.
- Haddii ilmuhi horay u qabay cudurka hablobaasta (Busbuska), talaalka busbuska looma baahna. Haddii cudurku dhacay ka dib 2010kii, dhakhtarku ilmuhi waa inuu soo saxeexaa foom xaqiijinaya cudurka.
- Ardayda fasalada koowaad ee óða sano jirka ah ama ka yar waa inay raacaan jadwalka dabaysha iyo DTaP / DT ee xanaanada (kindergarten).
- Talaalka shanaad ee DTaP looma baahna haddii talaalka afraad uu ka dambeeyay da'da 4ta sano. Qiyaasta kuurada ugu dambeysa ee DTaP da'da ama ka dib da'da 4ta sano.
- Talaalka afaraad ee dabaysha looma baahna haddii talaalka saddexaad uu ka dambeeyay da'da 4ta sano. Qiyaasta kuurada ugu dambeysa ee dabaysha markay tahay ama ka dib da'da 4ta sano.
- Waxaad ubaahan tahay cadeyn ugu yaraan sadex teetanada iyo gawracatada ay kujirto qiyasood oo kuuro ah. Haddii ilaa ugu dambeysay taxanaha DTaP / DT, looma baahna qaadasho dheeraad ah.
- Jadwalka laba-shot ee talaalka cagaarshowga B ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa carruurta da'da 11 illaa 15an sano ah.
- Hal qiyas oo Tdap ah ayaa loo baahan yahay laga bilaabo fasalka 7aad. Sidoo kale u baahan cadeyn ugu yaraan laba teetanada iyo gawracatada kujira qiyasta daawada (DTaP / DT / Td). Haddii cunug la siiyay Tdap ka hor fasalka 7aad, qiyas kale oo Tdap looma baahna.
- Hal qaadashoo tallaalka ayaa loo baahan yahay laga bilaabo fasalka 7aad. Qiyaasta kuuro ee xoojineysa ayaa badanaa la bixiyaa 16an sano.

Maxaa ka Socda Fasallada High Five-ka?

High Five waa barnaamij Carruurta Minneapolis ooafar jirsada Setember 1 bilaabayana kindergarten dayrta ku xigta.

Mudnaanta waxaa la siiyaa carruurtau qalma cuntada lacag la'aanta ah ama sicirkeeda la jabiyeey:
Bartaha luuqada ingriiska, ama yahay hoy la'aan ama hela adeegyada qorshaha Waxbarshada Shaqsiyadeed (IEP) ama Qorshaha isdhexgalka hay'adda shaqsiga (IIIP), iyadoo loo marayo baaritaanka caafimaadka iyo koritaanka ee loo aqoonsaday in uu halis ka imaan karto ama saameyn ku yeelan karaan waxbarshada cunugga.

High Five waa barnaamij u diyaariya carruurta
Kindergarten xoogna saaraya cunugga guud ahaantii.
Barnaamijka ayaa adeegsada cilmi-baaris manhaj da'da ku habbon ee Tilmaameyaasha horumarka Dhallaanka Minnesota ee Amminka Hore (Minnesota Early Childhood Indicators of progress)

- Koboca bulsheed iyo caadifadeed
- Hannaannada wax Loo Barto
- Korbinta Luqadda, Qorista & Akhriska
- Koboca Garashada
- Koboca Jirka iyo Lixaadka
- Xisaabaadka
- Hal Abuurka iyo Farshaxanka
- U Fakarida qaab Cilmeyeed

Manhajka High Five ayaa la isugu ururiyey saddex wallood oo asaasi ah:

1. **Goobo Waxbaraso bulsho:** Abuurid dareen wax wada barasho ee ay yeeshaan ardayda beesha iyadoo lagu ayidayo in ay noqdaan xilkas, dhageysi, la hadal midba mid ka kale, is waydiin su'aalo iyo

moogaysi/kaltan dhinacyada Luqada, suugaanta, xisaabta, Sayniska, iyo cilmiga culuunta bulshada.

2. **Waxbarasho fir-fircoo:** YCarruurta yar-yar sida ugu fiican ee ay wax ku bartaan waa khibradda ay ka helaan gacan ku heynta, shayaasha, dhacdooyinka iyo fikradaha.Caruurta waxaa lagu dhiiri galinaya in ay dhisaan cilmi qoto-dheer iyagoo kaashanaya isku fillaansho iyo khibrado kooxo ahaan.
3. **Dib U Milicsi:** Kulamo ay carruurtu ku kulmaan iyagoo goobo ahaan oo kale isugu wareegsan ayey u wadaagaan khibradaha iyo fikradaha. Taas oo ay ka helaan maalinimadii waxay barteen. Inta badan waa xiliga akhriska sheekada ama kor u wada akhrin sheekada mar labaad.

Haddii aad u baahan tahay taxane dhammaystiran ee barnaamijyada High Five, kala xiriir Adeegyada Meelaynta Ardayda. High Five-waa barnaamij khidmad ku salaysan iyadoo qiimo kala duduwan u diyaar yahay qoysaska u qalma. Qofna looma diidayo waayo waxayan awoodin inay khidmadda iska bixiyaan.



Maxaa ka Socda Fasallada Kindergarten-ka?

Aradya Fasalka kindergarten-ka ayaa fir-fircooni, sahmin iyo gacan ku hayntu tahaysida ugu haboon ee ay wax ku bartaan. Waxayna wax ku bartaan iyagoo adeegsanaya dareenkooda, waxayna diyaar u yihiin in ay u ballaariyaan garashadooda wax dhaafsiisan gyarahooda iyo fasallada, una gudbaan jiiraankooda iyo bullshada. Khibradahaasi waxay ka caawinayaan si ay u koraan si bulshanimo iyo indheer-garadnimo leh. Waxy-alaha soo socda waa xudunta ama bu'da aassaska u ah khibradooda sanadka ugu horeeya dugsiga.

Suugaanta Luqadda Ingiriisiga

- Maqal, dhihid, isku darka jabaqda/dhawaqyada
- Kocinta fahamka guud ee akhriska iyo qoraalka
- Barashada iyo isticmaalka erayada cusub
- Baahida Xiriirada, dareenka iyo fikirka

Xisaabta

- Akhris, qorid, is bar-bar dhig iyo isku aaddinta tirada dhan (whole numbers)
- Adeegsi xeelado badan ee tirinta
- U kala saarid shayada shaxan, midab am dherer (shape, color or length)
- Kala soocida waxyalo, loo kala saarayo qaabka ay u samaysan yihiin, midabka, iyo dherarka

Sayniska

- Ogaanshaha baahida asaasiga ah ee noolaha
- Ku barashada indho indhay iyo weydiimo su'aalo waxyalaha ku saabsan dunida

Culuunta Bulshada

- Meel ama juquraafi, ka halkee Adduunka?
- Soo yaalka Taariikhda/ kala horraynta: Waqtigay aheyd?
- Dhaqamada Aduunka, Siyaabahee iyo sababtee dhaqamada midba kan kale uga duwan yahay?

Barashada Farshaxanka

- Sahaminta iyo ogaanshaha alaadaha iyo ku ciyaarida walxaha farshaxaneedka
- Tijaabinta muusingga iyo u adeegsiga aaladaha jaan gooyada jabaqda/codka

Sixada/Fayadhawrka

- Ka wada hadla dareemmada
- Tus habka saxan ee gacmo dhaqidda ilkahana loo cadaydo
- Garwaqso noocyada cuntada nafaqada leh

Jimcsiga Jirka

- Baro farxadda ciyaartu leedahay
- Wadaaga qalabka, wada shaqeeyaa xaq-dhawrna kuwa kale
- Kobci xakamaynta oogada u adeegsana meesha kuu bannaan si ammaan leh

Luuqadaha Adduunka

- Ka qayb qaado wax-qabadyada dhaqmeed ee da'da ku habboon (tusaale. Heeso, sheekoojin)
- Aqoonso iskuna day erayada caanka ah
- Tilmaan summadeena shayada caanka ah

War-baahinta iyo Tignoolajiyada

- Doorashooyinka buugaag ku haboon, qaado oo xannaanee
- Qiimee sida sawirrada, shaxannada iyo garaafyadu nooca caawiyaa sheeko sheegid ama isula xiriiriyaan xaqiiqada
- U adeegso dalabyada qaarkood Kumbiyutar ku haboon shaqooyinka gaar ah

Sida Loo Doorto Dugsiga

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayaa aaminsan, taageerana doorashada waalidka. Waxaa ikhyaarro doorasho dugsiyo kala duwan ee Kindergarten oo diyaar ah. Doorasho dugsi ku habbon cunuggaaga iyo baahida qoyskaagu waa qayb muhiim ka ah hannaanka doorashada dugsiga.

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayaa siiya agabyo/ilo dhigaal iyo taageero shaqaale ka caawiya qoysasku inay fahmaan ikhyaarkooda, si ay u doortaan dugsiga ku habboon cunuggooda. Dugsiyada dadweynaha Minneapolis ayaa qabta carwada sanadlaha ah ee bandhiyada dugsiyada bisha janaayo sanad walba.



Kala xiriir Adeegyada Meelaynta Ardayda haddii aad ubaahan tahay maclummaad dheeraad ah ee agabyada/ila dhigaal ee soo socda:

- Tusiyaha Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis Pre-k-8
- Xaflada Diiwaan gelinta Dugsiyada (School open houses)
- Warbixinta dugsiyadu bulshada siiyaan iyo war barraahista (brochures)
- Shabakada Doorashada Dugsiyada:
exploremps.org
- Waaxda Waxbarashada Minnesota
(Minnesota Department of Education)

Ka tixraaca "Tusiyaha" Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis taxanaha buuxa ee dugsiyada, Pre-K-8 sharraxaadda barnaamijyada, cinwaannada iyo lambarrada telefoonnada.

Iskuul Doorashau waa go'aan qaadasho weyn.Qodobada soo socda oo ku qoran shaxda hoose waxay kaa caawinayaan inaad ka fakirto iskuulka ama dugsiga aad booqaneysid. Fiiri dhinacyadaada,dhageyso,su'aalo weydii,qaado qoraal yar.dabadeed is barbar dhig waxa aad meesha ku aragtayyo waxa aad cunuggaaga la rabtay iyo quyskaaga. U isticmaal nidaamkaan dugsi kasta waxaad ka heli kartaa barta inernetka:
exploremps.org

Tilmaamaha: U isticmaal darajaynta 1 ilaa 3, Calaamadi sanduuqa aad is leedahay muhiim ayay kuu tahay. Markaad isu gayso wadarta guud, waxaad awoodi doontaa in aad is bar bar dhigto kala duwaanshaha dugsiyada aad booqtay, kaddibna qiimayntaada is bar bardhig.

1 = Muhiim ahayn **2** = Wax yar muhiim **3** = Muhiim

Magaca: Dugsiga Hoose ee Meadow lane.

Wax-yaalahi laga fakaro		1	2	3	Su'aalo aad is-waydiinayso
1aad	Dhismaha Iskuulka	X			Mid-yar weyn?Ma waxaa uu u dhow yahay beer, dukaamo leh,wado mashquul ahama wado aan mashquul ahayn
2aad	Goobta dugsiga		X		U dhow gurigaaga, shaqadaada, ama xanaano caruur
3aad	Gaadiidka dugsiga			X	Masaafada lugta,mise waxaad u baahan tahay ba?Masaaf dheer amase mid gaaban?
4aad	Waxbarashada Galinka danbe			X	Xannaano Carruur waxbarashada galinka danbe,Waxqabadyo waxbarasho bulsho.Kaalmo shaqo guri?
5aad	Dhaqamo kala duwan		X		Luuqado isku dhaf ah iyo dhaqamo kala duwan?
6aad	Sumacada			X	Sidee dariskaaga,asxaabtaada iyo bulshaduba u arkaan dugsigaan?
7aad	Saaxiibada	X			Cunuggaagu ma ka helayaa dugsiga ,saxiib ka mid ah bulshada?
8aad	Doorka Waalidka		X		Ma dareemaysaa in laguu ixtiraamo sidii waalid ahaan?Maxay tahay fursadaha aad ka qeyb qaadan kartro dugsiga uu cunuggaaga dhigto?
9aad	Taclinta			X	Maxay yihiin natijjooyinka imtixaanada? Ma jiraan barnaamijyo gaar ah, sida sayniska,farshxanka tiknoolaji iyo luuqado? Maxay adayda iyo macalimiinta sameeyaan?
10aad	Jawiga xiriirkha arday & macallinka			X	Ardayga iyo dadka waaweyn ma lagu xushmeeyaa fasalada dheddooda,dugsiga dhexdiisa,iyo qalka qadadada? Khilaafaadka si xaqsoor leh ma loo xaliyaa?
Isku dar tirada dhibcaha saf kasta & wadar guud		2	6	15	Wadarta Guud: 23 dhibcood ayuu helay dugsigaan

Waxayaabaha La eegoo Markaad booqanayso dugsi

- Ma yihiiin maclimiintu kuwo daacad ah, hammad fiican u haya dugsiga iyo ardayda.
- Carruurtu ma yihiiin kuwo shuqlan oo faraxsan?
- Sidee bay kula tahay bay'adda waxbnarasho ee dugsiga?
- Shaqaalaha diyaar ma u yihiiin inay ka jawaabaan su'aalahaaga?
- Ma dareensan tahay soo dhaweyn?
- Sidee ayey ururrada waalidka u fir-fircooni yihiiin?
- Fursadaha ka qeyb-qaadasho waalidka ma yihiiin kuwo bayaan loo sheegay?
- Himilooyinkaa waxbarasho ee dugsiga si bayaan ah ma loo qeexay, mana ekeyn karaan waxyaabahaad adigu rumaysan tahay?
- Nidaamka anshax marinta dugsigu ma yahay mid si cad u qeexan loo sameeyey?
- Dugsigu ma bixiyaa waxyaabaha soo socoda; Farshaxan / Muusig khaas ah; waxqabadyada dugsiga kaddib, waxbarasho gaar ah, xannaano caruur dugsiga ka hor iyo kaddib; (sida, Minneapolis Kids)?

Magaca Dugsiga	Aragtida Guud ee Dugsiga	Farriimo Kale
1.		
2.		
3.		

Warbixinada Diiwaan-galinta

Da'da

Cunuggaagu waa inuu jiraa 5 sano Setember 1da ka hore si uu Kindergarten u galo dayrta.

Diiwaan gelinta

Si ay kindergarten u galaan, qoysaska oo idil waa inay ka buuxiyaan Adeegyada Meelaynta Ardayda kaadka codsiga dugsiga. Markii cunugaaga dugsi lagu qoro, waa inaad la xiriirto dugsiga si aad u dhammaystirto habraaca diiwaan gelinta. Wawaad u baahan tahay inaad keento dugsiga saddexdan shay, si cunuggaaga si rasmi ah loogu diiwaan gelijo dugsiga:

1. Diiwaan-reebyada Dhalashada.
2. Caddaynta tallaallada loo baahan yahay (eeg bogga 7aad). Si aad nuql u hesho la xiriir daryeel caafimaad bixiyahaaga.
3. Warbixinta Hubinta Dhallaanka Amminka Hore (Early Childhood Screening report). Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraada ee la xiriira jadwalka hubinta, wac 612.668.3715 (screen@mpls.k12.mn.us).

Baaritaan guud ayaan loo baahnayn, balse la idinku dhiirrigalinayaa. Wuxuu nala socodsiiinayaa xaalado saamayn ku yeelan kara waxbarashada. Haddii cunuggaagu qabo baahi gaah ah, waxaan doonaynaa inaan ku tala galno.

Diiwaan Reebyada Dhalashada

Warqadda dhalashada ayaa loogu baahan yahay si laguu diiwaan gelijo. Dukumentinga ay aqbali karaan Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis si ay u xaqiijiyan taariikhda dhalashada waxaa ka mida:

- Warqad cadeyn dhalasho
- Dal ku gal (Passport)
- Diiwaanka mad-habka baabtiisimka(Baptismal)
- Kaardhka Hay'adaha Socdaalka

Haddii aadan haysan warqadda dhalashada, la xiriir dalka cunuggaagu ku dhashay si aad u hesho diiwaan reebyadaasi.

Oggolaansho Hore ee Kindergarten

Inkastoo Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayan u talin oggolaansho hore kindergarten, waalidka qaarkood ayaa laga yaabaa inay dareeman in cunuggoodu bilaabo kindertarten ka hore waqtiga lagu taliyey. Nidaamka dugsiyada degmada waa haddii cunuggaagu 5an jirsaday inta u dhexaysa Seteembar 2eeda iyo Oktoobar 31eeda, cunuggaaga ayaa u qalma in loo tixgeliyo hore u oggolaansho kindergarten.

Carruurtu waa inay dhammaystiraan Hubinta Dhallaanka Amminka Hore iyo qiimaynta kale inta aan codsigooda oggolaanshaha hore la aqbalin ama loo dirin dugsiga. La xiriiri Hubinta Dhallaanka Amminka Hore si aad u qabsato ballan hubin. Haddii aad xiisaynayo oggolaansho hore ee kindergarten, fadlan wac Adeegyada Meelaynta Ardayda macluumaad dheeraada ee la xiriira habraaca oggolaanshaha hore.

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayaa leh barnaamijyo ka horreeya kindergarten eed u baahan tahay inaad u raadiso cunuggaaga; ka eeg bogga 17aad taxanaha barnaamijka.

Nashaadaadka

waxqabadyo xiisagelinaya waalid leh carruur u dhexeeya dhalasho

Waa kuwan waxyaabo sahlan oo madadaalo leh waalidka iyo daryeelayaashuna ay samayn karaan si ay ugu caawiyaan inaad u diyaar garoobaan Kindergarten, bilaabanaya marka ilmuhi dhasho

Luuqadda

- La hadal, la hadal, la hadal cunuggaaga.
- Ka jawaab celi hadaaqa cuniggaaga kuna dhiirrigali isaga/iyadu inuu/inay sameeyo/ samaso dhawaaqyo dheeraad ah.
- La hadal oo la hees cunuggaaga si joogto ah maalin kasta.U sharax waxa adiga iyo cunuggaagu aad samaynaysaan, aragtaan adna dareentaan.
- U akhri buug masawiro leh.
- Weydii su'aalaha Una Jawaab.
- Dhageyso cunuggaga.

Dhaqdhaqaaqa

- Sii wakhti dheeri ah oo aad ku ilaalso xiliga rooggaa iyo bustaha.
- Hubi in meesha uu ku ciyaarayo ay tahay meel nabdoon oo wax lagu sahamin karo. Ka ilaali cunuggaaga waxyaabaha afka leh oo wax jara iyo xargaha korontada iyo daahyada daaqadaha ee uu gaadhi karo.
- Ku dhiirrigali cunuggaaga markuu isagu/ iyadu barto/barato xirfado cusub.Ku caawi cunuggaaga in uu helo khibrado guul ah.

Koboca Dareenka Buulshada

- U muuji kal gacal, hab-sii oo dhunko.
- Ka warqab dareemmada (adiga iyo cunuggaba) markaana kor ugu dhawaaq una sheeg.

- Ku dhiirrigali cunuggaaga in uu isku filaado.
- Soo jeedi cunuggaaga dareenkiisa adigoo indhaha kala hadalaya.

Xirfadda is-caawinta

- Bar gamaco dhaqasho joogta aha maalin walba. Una hees intay gacmaha dhaqanayaan:
- "Waa sidan sidaan u gacmo dhaqanno, gacmahaaga dhaq, gacmahaaga dhaq..."
- Sii waqtii uu cunuggagu ku qabatimo carbiska xirfadaha cusub(cunida,labiska,musqusha,is-nadiifinta,iwm)
- Inay dharka gashadaan waxaa uga sahlan ilmaha inay dharka iska bixiyaan.ku bilow cunuggaaga gur-guuranaya inuu kugu caawiyoo sidii aad dharka uga bixin lahayd.



Nashaadaadka

Waxqabadyo xiisagelinaya waalid leh carruur u dhexeeyaa 3 ILAA 5 JIR

Waa kuwan waxyaabo sahlan oo madadaalo leh waalidka iyo daryeelayaashuna ay samayn karaan si ay ugu caawiyaan inaad u diyaar garoobaan Kindergarten, bilaabanaya 3-5jir.

Luuqadda

- La hadal, la hadal, la hadal cunuggaaga.
- Ku caawi cunuggaga in uu barto ereyo cusub maalin kasta.
- Ku dhiiri gali in ay ku hadlo jumlad dhameystiran.
- Weydii cunugga su'aalo fara badan maalinta oo dhan.
- Dhageyso Cunuggaaga.
- La sheekayso cunuggaaga.

Akhris

- Kor wax u akhri cunuggaaga maalin walba.
- Cunuggaaga la qaad hees carruureed isku jaan gooyo lehma.
- Ku caawi cunaggaga inuu barto xarfaha alif-beetada, farta ugu taabo alifbeetada iyo lambarrada maalin walba.
- Bar cunuggaaga xarfaha magaciisu/eedu ka kooban yahay/tayah.

Xisaab

- Tiri sheeyada yaalaa guirga sida alaabta caruurtu ku ciyaarto ,kabaha , faraha, cuntada, iyo kuraasta.
- Waydii cunggaaga inuu isku laalaabo hagaagjiyana sharaabaaddo ama isku hagaajiyo kabaha isla markaasna isu xijiyo siday u kala yar yihiin ilaa weyn yihiin.
- La ciyaar dheelo sida kuwo is- xujayn oo kale ah.



Qoraal

- Ku baraaruji cunuggaaga in uu feegaaro, sawiro, ama wax rinjiyeeyo.
- U oggolow cunuggaaga in uu ku daawado markaad qoraysid jeeg, waxyaboo taxan, farriimo ama warqado.
- Ku soo dhawee cunuggaaga in uu la raaco qalin midabbo leh xarfaha iyo lambarrada. Ku dhiirrigali inay kor ugu dhawaaqaan xarafka ama lambarka.

U gudubka Kindergarten

Waxaa jira waxyaabo fara badan eed samayn karto si aad uga caawinto cunugaagu la qabsado Kindergarten, diyaarna ugu noqdo maalin walba inuu waxbarto. Taloooyin kaa caawinaya sidaad uga qayb qaadan karto waxbarashada cunugaaga, uuna ugu fiicnaan karo dugsiga ayaa hoos ku taxan.

Ku caawi cunugaagu inuu la qabsado Kindergarten

- La booqo cunuggaaga dugsiga am aka qayb qaado diiwaan gelinta (badanaaba dhawr asbuuc ka hor intaan dugsiga la furin , si isaga/iyadu u barto/bartaan shaqaalaha iyo dhismaha.
- Si waxtar leh ugala hadal dhigada Kindergarten, la wadaag wixii aad ka xusuusato kindergarten.
- Akhri buugaagaagta Kindergarten: Miss Bindergarten Gets Ready for Kindergarten, by Ashley Wolff; Look Out Kindergarten, Here I Come, by Nancy Carlson; When You Go to Kindergarten, by James Howie & Betsy Inersheen; King of Kindergarten, by Derrick Barnes.
- Masawir khaas ah ama farriin kaa socota geli boorsada cunuggaaga.
- Dib ula Milicso cunuggaaga shuruucda ammaanka baska. Intaan la gaarin maalinta koowaad, sii xoogaa carbisa- ku ordaysaa bas joogsiga si uu kuugu caawiyo inaad aad raaxa u dareento.

- La wadaag macallinka kindergartenka galkisainta aanu dugsiga gelin, si uu macallinku ula socdo hannaanka waxbarasho ee cunugaaga.
- Ka qayb qaado shirkha waalidka- macallinka, la hadal macallinka ama farriin ugu dir dugsiga haddii aad walaac ka qabto waxbarashada cunuggaaga ama aad ku faraxsan tahay wuxuu cunuggaagu baranayo.
- Hubi in cunuggaaga aad u nasto una sameey waqtii uu habeen walba seexdo.
- Hubi in cunuggaagu dugsiga tago waqtiga loogu talagalay maalin walba haddii aanu xanuun sanayn. Hawl maalmeedkaasi ood samayso ayaa ammin hore hubinaya in isaga/ iyadu si joogto ah u tago/tagto dugsiga. Wac dugsiga si aad ugu sharraxdo maqnaansho ama soo daahid.
- Maalin walba, hubi boorsada dhabarka ee cunuggaaga, iska hubi haddi cunuggaagu wado farriimo khaas ah ee ay guriga ugu soo dhiibeen maamulaha iyo macallimiintu.
- Ku dheji sumad muujinaya magaca cunugga adigoo ku dhajinaya (jaakadda,ama funaanada, koofiyada IWM) bar cunugga in barto magaca sumadiisa.
- U xir cunuggaaga dhar ku haboon cimilada iyo ciyaaraha fir-fircoo.
- Dugsiga si deg deg ah ugu wargeli haddii aad beddesho cinwaankaaga, telefoonka ama meesha aad ka shaqayso. Haddii ay jiraan isbeddello, kaararka deg degga ah ee dugsiga ayaa u baahan in la cusboonaysiyo.cards at the school will need to be updated.

Sida aad Uga Caawin Karto in Cunuggaagu Dugsiga Ku Fiicnaado

- Ku caawi macllinku inuu yaqaanno cunuggaaga; booqo dugsiga lana kulan macallinka iyo maamulaha.

Erayad Bixinnada

Charter Schools waa dugsi dadweyne madax bannaan ayna qaban qaabiso dugsiyo degmo, jaamacad, gobolka ama urur aan faa'iido doon ahayn. Dugsiyada Jaartarrada ayaa ku shaqeeya heshiiska ay la galaan qaban qaabiyyaha.

Community Schools waa dugsiyo ardayda dhigata ay ka yimaadaan bulshada ku hareeraysan dugsiga. Dugsiyada Bulshada ayaa ku salaysan waxyaabaha ay danaynayaan qoysaska dugsigu. Dhigashada dugsiga bulshada ayaa u sahla qoysasku inay ka qayb qaataan waxbarashada cunugga, ay yar tahay masaafada bas raaca, isla markaasna ay fudud dahay in lagu saleeyo han iyo bulshada jiiraanka.

Early Childhood Family Education (ECFE) waa barnaamij loogu tallogalay qoysaska leh caruurta ilaa 5 jirka. ECFE ayaa waalidka ku caawiya inay ilmahooda siyaan fursadaha koboca waxbarasho ee ugu fiican. Wawaana ka mid ah fasallada, barashada waalidka ugub/dhayid caano nuugyada, Early Ones; Toddlers; Terrific Twos; Prime Time for Preschoolers; Book Topic: Focused Parent Discussions; Daddy & Me; Play & Learn; Adventures in Parenting. Khidmada ayaa kala duwan, Qofna looma diidayo dhaqaale la'aan darteed.

Early Childhood Special Education (ECSE) waa adeeg la siiyo carruurta u baahan adeeg waxbarasho gaar ah kaabana koboca iyo dib-udhaca garaadka aqooneed. ECSE waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo u gooniya ilmo iyo qoys kasta baahida sida: dib- u-dhac faham & korriimo, Autism; maqal ku dhib qab, naafo ka qaba dhinaca lixaadka, xasilooni darro ama dhinaca xiska & maanka iyo waxyaabo kale ee caafimaadka la xiriira.

***High Five (Prekindergarten)** waa barmaamij u diyaariya carruurta xanaanada iyadoo xoog la saarayo cunugga gebi ahaan. Macalimiinta High Five waxay carruurta u diyaariyaan wax qabad fir fircoo iyo casharo xoog saaraya cunugga horumarkiisa sida luqadda iyo xirfadaha suugaanta; jimicsiga; shaqsiyadiisa iyo xirfado bulsho. Ardaydu waa in ay u qalmaan shuruudaha looga baahan yahay barmaamijkan. . High Five waxaa uu baxaa maalin galinkeed (3 saacadood) ama barnaamij maalinta oo dhan baxaya.

Kindergarten waa barnaamij baxa maalinta saacadaha dugsiga. Si loo galo Kindergarten- ka, carruurtu waa in ay 5an jirsadaab ama ay 5an jir noqdaan inta ka horaysa Siteembar1eeda. Waalidku waa in ay ka buuxiyaan kaadhka codsiga Xarunta Meelaynta Dugsiyada ama Xarunta Qoysaska Cusub. Kaadhka waa inaad boostada ku soo dirtaa ugu dambayn xilliga loogu talagalay (haddii ay jirto wax ku saabasan isbeddel xagga taariikhda, soo wac Xarunta Meelaynta Ardayda si aad u hesho taariikhda saxan) si aad uga mid noqoto dadka ka qayb galaya sanad dugsiyedka soo socoda. Waalidku waa codsan karaa wali dugsi xataa haddii ay dhaaftay wakhtigii loo qorsheeyay in waalidku ku codsado idugsi, hase yeeshee waxaa suuragali kara in doorashado kooban tahay.

Eray Bixinnada

Magnet Schools dugsiyada magnetka ee magaalada ayaa soo dhaweynaya ardayda ka soo jeeda dhammaan xaafadaha Minneapolis oo ku salaysan xiisaha ay u leeyihii mawduucyada tacliinta gaarka ah: Farshaxanka, STEM (Sayniska, Teknolojiyadda, Injineerinka iyo Xisaabta), STEAM (Sayniska, Teknolojiyada, Injineerinka, Farshaxanka iyo Xisaabta), Isbaanish Labo Luuqadood, Montessori, iyo Daraasaadka Caalamiga ah & Aadanah. Wuxuu intaa dheer in diiradda gaar loo saaro, dugsiyada magnet MPs magaalada quusinta ardayda waayo-aragnimada waxbarasho cusub oo taageera horumarinta mustaqbalkiisa iyo dhiiri ka qaybgalka bulshada iyo qoyska. Ardaydu waa inay codsadaan inay ka qayb galaan dugsigamagnetka ee magaalada, oo meelaynta waxaa lagu sameeyaa bakhtiyaa nasiib iyo meel bannaan oo la heli karo.

Minneapolis Kids School Age Care waa barmaamij sanadle ah ee Dugsiyadaada Dadweynaha Minneapolis ku bixiyaan waxyaloo xiiso leh, daryeel caafimaad kala duwan tayo leh High Five ka hor ama kaddib ama Kindergarten hal gelin ah xilliyada jiilaalka ama guga iyo waqtiyada dugsiyadu fasax jiraand. Shaqaalah xanaanada caruurta oo xirfad leh ayaa qorsheeya inay si taxadar leh horjooge uga noqdaan waxqabadka ay dugsiyada. Fadlan la soo xiriir xafiiska Minneapolis Kids qadkooda taleefanka 612.668.3890 ama e-mail at mpls.kids@mpls.k12.mn.us.

Diiwaan-gelint Baah-san qaynuunka gobolka ayaa u oggolaanayo ardaydu inay dhigtaan dugsi ka baxsan degmada ay deggan yihii (tusaale, haddii aad deggan tahay meel ka baxsan Minneapolis, aadna doonayso cunuggaagu inuu dhigto Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis, ama haddii aad ku nooshahay Minneapolis aadna doonayso cunuggaguu inuuu dhigto dugsi dadweyne ee ka baxsan MinneapolisMinneapolis. Eeg bogga 19aad wixii warbixino dheeraad ah.

Barnaamijka Dhalinyarada Urka Qaada (Teen Parent Services - TPS) Iskuulada Dad weynaha Minneapolis waxay siiyaan ardayada dhigata iskuulada Minneapolis oo leh caruuraha xanaano caruureed oo adeegeedu uu aad u sareeyo. Barmaamijkan ma la soo gaabayo waa loo yaqaan TAPPP waxaay leeyihii goobo xanaano caruureed , gaadiid, tacliin ku saabsan waalidnimada iyo caruurta.



Barnaamijyada Gobolka Minnesota

Diiwaan-gelint Baah-san

Qaynuunka gobolka ayaa u oggolaanayo ardaydu inay dhigtaan dugsi ka baxsan degmada ay deggan yihiin (tusaale, haddii aad deggan tahay meel ka baxsan Minneapolis, aadna doonayso cunuggaagu inuu dhigto Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis, ama haddii aad ku nooshahay Minneapolis aadna doonayso cunuggaagu inuuu dhigto dugsi dadweyne ee ka baxsan Minneapolis). Waxaa inaad fuliso saddexdan shuruudood:

1. Waa inay meeli ka bannaan tahay dugsiga aad dalbanayso.
2. Waa inaad buuxiso xaashida codsiga diiwaan-gelinta baahsan (open enrollment application form). Haddii aad u baahan tahay macluumaad, wac Xafiiska Adeegyada Meelaynta Ardayga.



Su'aalo?

Xarunta Meeleynta Ardayda

1250 W. Broadway Ave., Minneapolis
612.668.1840

Waxbarashada Dhallaanka Amminka Hore

1250 W. Broadway Ave., Minneapolis
612.668.2140

Xafiiska Degmada ee Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis

612.668.0000

mpls.k12.mn.us



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens

Waxbarashada Dhallaanka Amminka Hore
1250 W. Broadway Ave., Minneapolis, MN 55411

KU SOO DHAWOOW XANAANADA CARUURTA!

